



# LAAMIYEYNTA GREEN LAKE IYO WALLINGFORD IYO HAGAAJINTA SODCAALLADA KALA DUWAN

Waddooyin nabad u ah dadka lugeeynaya, baaskiillada, ama raaca gaadiidka dadweynaha  
Nofembar 2018

## DULMAR GUUD MASHRUUCA

Ugu horreyn 2019, waxanu dib u laamiyeeyn iyo hagaajin doonnaa qaabka leymanka bulshooyinka Green Lake iyo Wallingford si aannu ugu curinno meelo nabad ah qof kasta—ama ha lugeeyeen, baaskiil ha raaceen, gaari ha wateen, ama bas raacaan. Fiiri maabka meelaha la laamiyeynayo iyo meelaha loo hagaajinayo socdaallada kala duwan.

## UJEDKA LAAMIYEYNTA

Sannad kasta, waxanu laami saarnaa waddooyinka halbowlaha ee uu xaalkoodu liito si aannu dhib uga iman, u sinnaadaan, iyo in cimrigooda raago. In nidaamka gawaarideenna u ahaadaan kuwo xaalkoodu dayactir fiican yahay waxey caawineysaa in kharashka mustaqbalka lagu hagaajinayo yaraado.

Marka aannu dib laami u saarno waddooyinka, waxanu heysannaa xittaa fursad aannu wax ku hagaajin karno! Haddii aad tahay qof socda, gaari wata, ama raaca basaska, waxad arki doontaa:



Isgoysyo la hormariyey laguna soo kordhiyey nalal cusub iyo goobo dadka lugeynaya iyo kuwa baaskiillada raaca si nabad ah uga gudbaan



Hagaajin lagu sameeyey waddooyinka lugeynta iyo waddo dhinaceedyada ay maraan dadka kuraasta curyaamiinta ku safra



Hagaajin lagu sameeyey laymanka baaskiillada oo si nabad ah magaalada oo dhan isugu xira



In dadka lugeynaya loo hagaajiyey isgoysyada



Jasiiraha basaska oo cusub iyo dugaallo si loo hagaajiyey tayada iyo kalsoonida dadka raaca gaadiidka

## MAXAA CUSUB

Waxannu ku howl jirnay qorshaha la soo bandhigay ee lagu hagaajinayo qaabka waddada, qodeynay farsamooyin faah-faahsan, isuna ururineynay fikradaha aannu dhageysnay.

Tilmaamaha waddo cusub waxa ka mid ah:

- In ka badan 6 maayal oo dib loo laamiyeeyey
- In ka badan 500 waddo dhinaceedyo cusub ama dib u hagaajin lagu sameeyey si loo waafajiyo shuruudaha Sharciga Americans with Disabilities Act (ADA)
- Ku dhowaad 4 maayal cusub, la qurxiyey, ama casriyeeyn lagu sameeyo laymanka baaskiillada, waxa ka mida:
  - Laymanka baaskiillada oo la dhowro ee ku teedsan waddada Green Lake Dr iyo Green Lake Way ee xiga dhinaca bari ee harada ama biyaha, iyo usii wadista Stone Way ilaa waddada 46th
  - Casriyeeyn leyman baaskiillo ee galbeedka waddada N 50th iyo Stone Way North
- Hagaajinno lagu sameeyo isgoysyo badan, ay ka mid yihiin meelo si gaara loo xushay
- Waddo dhinaceedyo socod iyo beddelis meelaha qaar
- Goobaha bas raaca oo meelo kale loo raro iyo daristooda si dhaqsiiyaha iyo ku tiirsanaanta gaadiidka u hagaagaan

## JADWALKA MASHRUUCA

**2019:** Waxa bilaabanaya dhismaha

**2020:** La filayo in la dhameeyo

Mashaariicdani waxa lagu maal-geliyey Canshuurta 9ka sano ee Move Seattle, waxayna cod-bixiyeyaashu ansixiyeen 2015. Wax badan kaga ogow canshuurta halkan [www.seattle.gov/LevytoMoveSeattle](http://www.seattle.gov/LevytoMoveSeattle)

## WARBIXINNO IYO LA XIRIIR

[www.seattle.gov/transportation/greenlakepaving.htm](http://www.seattle.gov/transportation/greenlakepaving.htm)  
Laamiyeeynta Green Lake iyo Wallingford iyo Hagaajinta Kooxda  
Mashaariicda Hab-raacista kala duwan  
(206) 693-4151 | [greenlakepaving@seattle.gov](mailto:greenlakepaving@seattle.gov)



Seattle  
Department of  
Transportation



# LAAMIYEYNTA GREEN LAKE IYO WALLINGFORD IYO HAGAAJINTA SODCAALLADA KALA DUWAN

Faahfaahinno dheeri ah ku saabsan qaababka waxad ka heli kartaa: [www.seattle.gov/transportation/greenlakepaving.htm](http://www.seattle.gov/transportation/greenlakepaving.htm)

## WAXANU KU SAMEYN DOONAA HAGAAJIN WADDOOYINKAN SOO SOCDA:

**N 40th St:** Stone Way – Latona Ave NE

**Wareegga Green Lake:** Green Lake Dr iyo Green Lake Way iyo dhinaca bari ee harada, Stone Way ilaa 45th

**N 50th St:** Phinney Ave – Roosevelt Way

**N 80th St:** Aurora Ave – I-5



City of Seattle waxey laamiyeyneysaa qeyb ka mida waddada N 40th St, N 50th St, N 80th St iyo waddooyinka dhinaca bari ee Green Lake sida ugu dhaqsiyaha badan ee 2019. Si aad u hesho tarjumaan ku saabsan wararkani soo wac (206) 693-4151

La Ciudad de Seattle pavimentará porciones de las calles N 40th St, N 50th St, N 80th St y calles en el lado este de Green Lake a más tardar para el 2019. Para solicitar la traducción de este material llame al (206) 693-4151.

西雅图市政府最快将于2019年铺设以下的部分路面：N 40th St, N 50th St, N 80th St以及 Green Lake 东边的街道。請告訴我們如何透過修改 2019 年計劃鋪設的路線(請參看地圖)來更好地滿足您的需求。如需這些資料的譯文, 或是在會議時需要口譯服務, 請致電 206-693-4151。